

Diseembar 12, 2024

**Xubnaha Guddiga Xilku ka sii dhamaanayo ayaa u  
Dabaal degay Ka hor inta aan Hogaaminta loo Gudbin  
Hogaamiyaasha Cusub**

Shirka Joogtada ah ee ugu dambeeyay ee Guddiga Waxbarashada Gobolka DeKalb ee 2024 ayaa lagu soo gaba gabeeyay abaal marin qiiro leh Diseembar 9-keeda iyadoo sadex xubnood oo Guddiga ay si go'naan leh u diyaariyeen inay xilka baneeyaan. Iyadoo ay ku hareeraysan yihiin asxaabta, shaqaalaha, iyo xubnaha bulshada, Dugsiga Degmada Gobolka DeKalb (DCSD) ayaa abaal marin ku siisay Marwo Anna Hill, Dhaqtar Joyce Morley, iyo Marwo Vickie B. Turner kulanka Guddiga iyo kadib xaflad soo dhaweynta oo sharafeyntooda ah.

Aqoonsigaan wuxuu ahaa labadaba dabaaldag iyo guul muhiim ah. Waxay calaameysay gabagebada cutubta saameysay sadex qof oo doorkooda ku wajahan xukun, hal abuur iyo naxariis. Xubin kasta oo Guddiga ah ayaa gadaal uga tagayo guulo abuuray fursado cusub, laga soo bilaabo kormeerka maaliyada xeeladeysan ee xeerarka xudunta u ah agagaarka uusha iyo fayd qabka ardayga.

Kormeeraha guud Dhaqtar Devon Q. Horton ayaa bogaadiyay adeegooda iyo ka go'naantooda sannadaha la soo dhaafay.

“Waxay si joogto ah u muujiyeen heerarka ugu sareeya ee ka go'naanta ee looga dhigayo Degmadeena sida ugu wanaagsan ee ay noqon karaan,” waxaa yiri Kormeeraha guud DCSD Dhaqtar Devon Q. Horton. “Aad baan ugu faanaa inay ii doortaan Guddigaan si aan u hogaamiyo Degmada oo xattaa aan ku faano inaan ka dhinac shaqeyo shaqsiyaadkaan aan caadiga aheyn.”

Marwo Anna Hill, oo u shaqeynayay sida wakiilka Degmada 1 tan iyo 2021, waxay shaqadeeda ka dalbatay aragtiyada taxadarka, ee maaliyada diirada saaro. Xisaabiyaha guud ee shahaadada haysta ee ka shatiyeysan Georgia, waxay keentay aragtiyo sannado maaliyadeed ah iyo xiriir bulsho oo qotodheer, oo tilmaameysa qalinjabinta dhawaan ee wiilkeeda ee Dugsiga Sare Chamblee. Inta lagu jiray xilligeeda, Marwo Hill waxay ku faantaa inay kobciso midnimada oo ay si miyir leh uga shaqeyso xoojinta wakiilnimada maaliyadeed ee Degmada.

“Waxan ka arkay dhinaca waalidka oo sida aan wax ugu biirin karo oo aan u caawin karo sida xisaabiyaha guud ee shahaadeysan,” ayay tiri. “Waan u kornay sida Degmo ahaan, oo waxaan u kornay sida bulsho. Ka shaqeynta dugsiga degmadoo dhan- dhammaan todobada degmo- iyo ka fikirida in qof walba uu yahay isbedel cajiib ah, aad ayaan ugu faraxsannahay shaqadaas.”

Muddada Dhaqtar Joyce Morley sida wakiilka Guddiga Degmada 7 waxay muujineysaa muhiimada ay leedahay ka go'naanta mudada dheer iyo qibrada waxbarashada. Maadaama uu yahay xubinta ugu muddada dheer Guddiga hadda jira, isagoo ku soo biiray 2013, Dhaqtar Morley

aad ayuu u garanayaa hormarka DCSD. Taariiqdeeda sida labaduba baraha dugsiga dadweynaha iyo borofosoorka dugsiga sare dhaafsan waxay xoojisay aragtideeda iyo fahamkeeda. Iyada, nuxurka dhabta ah ee Degmada waxay ku jirtaa ardayda laftooda. iyada, waa qiyaasta ugu dambaysa ee guusha.

“Waxaan ahay bare in ka badan 40 sanno, oo waxay ii aheyd waaya aragnimo weyn. Sheyga iigu muhiimsan waa carruurta,” waxaa yiri Dhaqtar Morley. “Markii aan booqdo dugsiyada ama aan ka maqlo maamulayaasha, waan ku farxaa wax ku saabsan iyada taasi waa waxa ay ku saabsantahay—waxa ka socda dugsiyada sababtoo ah taas waa meesha ay carruurta joogaan.”

Wakiilka degmada 5 iyo Guddoomiyaha hore ee Guddiga, Marwo Vickie B. Turner, waa bare leh qibrad ka badan labaatan sanno. Inta lagu jiray adeegeeda 10ka sanno ee Guddiga, waxay bixisay cod joogto ah oo lagu kalsoonyahay. Waxaa u doortay asxaabteeda sida labadaba gudoomiye ku xigeen iyo gudoomiye, hoggaaminta Marwo Turner waxaa hagayay aaminaadeeda iyo aqleeqdeeda adag. Waxay u aragtaa waxbarashada dadweynaha sida sabab aad uga muhiimsan nafteeda, iyadoo u hureyso dadaaladeeda lagu hormarinayo nolosha ardayda, qoysaska, iyo shaqaalaha iyadoo loo marayo Gobolka DeKalb.

“Ma jirto sabab ka weyn waxbarashada dadweynaha. Wax baa igu soo jiiday oo igu dhahay ka qeybgal xalka sababtoo ah waxaan dhammaanteen qeexi karnaa dhibaatada iyo caqabadaha haysta bulshooyinkeena,” Marwo Turner ayaa tiri.

“Laakiin waa wax kale in la noqdo mid xal leh, oo taas muhiim ayay ii aheyd. Waxay ii aheyd sharaf iyo mudnaan inaan la shaqeeyo koox dad ah oo aad u kala duwan oo xudun noogu ah hareeraha arrinta, Dugsiga Degmada Gobalka DeKalb ee gaarka ah. Markii aan isku tashanay, waxaan sameynay waxyaabo fiican oo weyn, kuwaasoo ahaa sharaf iyo mudnaan.”

Sadexdaan hoggaamiye ee xilka ka degaya waxay ka tageen dhaxal raadinayo mideynta bulshooyinkal kala duwan, u horseeda masuuliyada maaliyadeed, oo weligoodna aysan lumin aragtida cida ugu muhiimsan: ardayda Gobolka DeKalb.

Si loo hubiyo, sadexda xubnood ee Guddiyada soo galayo waxay u keenayaan aragtiyo cusub shaqada muhiimka ah ee lagu dhisayo jawiyo waxbarasho kobcineyso Degmadoo dhan. Socdaalkooda wuxuu ku bilowday si ku aadan taariiqda guulihii cajiibka ahaa ee ay sameeyeen kuwii iyaga ka horeeyay.